



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
Ministry of Information, Culture & Tourism

Date: 04/09/2019

WAR-SAXAAFADEED

04 September 2019: Dowladda Federaalka Soomaaliya waxay maalmahan ishaa ku haya rabshadaha ka dhacaya dalka South Africa oo ay ku noolyhiin muwadiniin Soomaaliyeed oo u badan ganacsato kuwaasoo weeraro lagu qaaday sanooyinkii lasoo dhaafay iyo rabshadaha hada dhacayaba ay kasoo gaadheen waxyeelo nafeed iyo mid hantiyeed.

Dowlada Soomaaliya waxay ka xuntahay falalka boobka iyo barakicinta ah ee loo gaysanayo muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo ganacsigooda, waxayna ka codsanaysaa dowlada South Africa inay ilaaliso oo ay damaanad qaado badqabka muwaadiniinta Soomaaliyeed iyo hantidooda.

Ugu danbayn, dowladda Soomaaliya waxay muwaadiniinteeda deggan dalka South Africa ugu baaqaysaa in ay feejignaan iyo taxadar dheeri ah muujiyaan hadba wixii soo kordhana lawadaagaan safaaradda Soomaaliya dalka South Afrika



DHAMAAD